

**OGAYSIIS DHAGAYSIGA DADWEYNAHA**  
**QORSHAHAA LA ISKU DARAY EE SANADKA BARNAAMIJKA 2025-29**  
**ISTARAATIIJIYADDA QORSHAHAA SANADLAHA AH EE SANAD MAALIYADEEDKA 2025-**  
**26**  
**DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA, ISKAASHIYADA MAALGASHIGA GURYAHAA, IYO**  
**BARNAAMIJYADA DEEQDA XALLINTA XAALADAHAA DEGDEGGA AH**

Waxaa halkaan lagu bixinayaa ogeysiis ah in Guddiga Kormeerayaashu ay qaban doonaan dhegeysi dadweyne markay tahay 9:00 a.m. taariikhduuna ay tahay Oktoobar 22, 2024, qolka 310 ee Xarunta Maamulka Degmada, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA, dhagaysigaas oo ku saabsan Istaratiijiyadda Qorshaha La Isku Daray ee Sannadka Barnaamijka ee 2025-29.

Ka faa'iideystaha deeqda Waaxda Guryeynta iyo Horumarinta Magaaloooyinka ee US (HUD) ahaan ee hoos timaada barnaamihyada Deeqaha Horumarinta Bulshada (CDBG), Iskaashiga Maalgashiga Guryaha (GURI) iyo Barnaamijyada Deeqaha Xalinta Xaaladaha Degdegga ah (ESG), Degmada San Diego (Gobalka) waxay samaysaa Qorshe Isku-dhafan oo shan sano ah. Ujeedada aasaasiga ah ee Qorshaha La Isku Daray waa:

1. Aqoonsiga baahiyaha mudnaanta leh guriyeynta iyo horumarinta bulshada ee ka jira maamulka degmada iyada oo loo marayo falanqaynta suuqa, fikrad dhiibashada bulshada, iyo wadatashiga daneeyayaasha, iyo;
2. Si xeeladaysan u dejinta yoolal shan sano ah oo wax looga qabanayo baahiyaha mudnaanta leh ee bulshada iyo ilaha deeq-bixinta ee dawladda dhewe, gobolka, degaanka iyo shirkadaha gaarka ah kuwaas oo laga yaabo in looga faa'iidaysto maalgelinta HUD.

Barnaamijyada CDBG iyo ESG ee "Degmada Magaalada" San Diego waxay maalgaliyaan guriyeynta, horumarinta bulshada, iyo adeegyada iyo waxqabadyada guri dadweynaha ee aagga aan la wadaagin iyo lix magaalo oo ka qaybqaata barnaamijyada ee kala ah Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach. Barnaamijka Dalada Guryaha HOME ee Degmada San Diego waxay bixisa lacag loogu talagalay hawla guryeynta ee aagagga Barnaamijka ESG iyo CDBG iyo sidoo kale lixda magaalo ee Dalada ee kala ah Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista. Barnaamijka HOPWA wuxuu bixiyaa maalgelin loogu talagalay guryaha iyo adeegyada la xiriira guryaha ee loogu talagalay dadka la nool cudurka HIV/AIDS iyo qoysaskooda ee dhamaan gobolka San Diego.

Istaraatiijiyada Qorshaha La Isku Daray ee 2025-29 waxay soo jeedinaysaa in la gaaray yoolalka Qorshaha La Isku Daray ee 2025-29. Yoolalka Qorshaha La Isku Daray ayaa dejinaya waxyaabaha mudnaanta leh ee haga isticmaalka maalgelinta HUD ee ku salaysan ra'yi-celinta dadweynaha, taloooyinka daneeyayaasha, iyo tilmaamayaasha xogta bulshada. Istaraatiijiyada iyo yoolalka Qorshaha La Isku Daray ee la soo jeediyay waxaa heli karaa khadka [www.sdhcd.com](http://www.sdhcd.com).

Dadweynaha waxaa lagu martiqaadayaan inay ka soo qaybgalaan dhageysiga dadweynaha si ay faallooyin uga bixiyaan Istaraatiijiyadda Qorshaha La Isku Daray ee 2025-29. Dadweynaha waxay sidoo kale bixin karaan faallooyin qoraal ah inta lagu jiro xilliga faallooyinka ee 30-ka maalmood ah ee dhammaanaya Oktoober 22, 2024. Faallooyinka qoraalka ah waa in lagu hagaajiyyaa Hay'ada Adeegyada Guriyeynta iyo Horumarinta Bulshada, Qaybta Horumarinta Bulshada, 3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123, (619) 346-3375, ama waa in iimayl ahaan loogu diraa: [Community.Development@sdcounty.ca.gov](mailto:Community.Development@sdcounty.ca.gov). Dadka dhegaha la'a ama maqalka uu ku adag yahay waxay waaxda kala xiriiri karaan lambarka (866) 945-2207. Dadka u baahan in laga caawiyo ka qayb galka kulanka (aan Ingirisiga ku hadlin, maqalkoodu culus yahay, iwm.) waa inay la xiriiraan shaqaalaha ugu yaraan shan maalmood kahor intaan la gaarin kulanka si ay u codsadaan wixii qabanqaabo gaar ah.